

Aula

Xiriirka dugsiga barbaarinta

Aula



Waa maxay Aula?

Aula waxay noqon dagalka xiriirka ee cusub ee dugsiga barbaarinta marka Aula ay baddasho DagIntra 2021. Wali waanu sii wadi isticmaalka INFOBA marka wada shaqayntu khusayso barashada, koboca, fayoqabka iyo waxbarashada ilmahaaga. Halkan waxaad ku arki kartaa, tusaale ahaan, foomamka Focus Child ee ilmahaaga.

Dugsiyada aasaasiga ah, qorshayaasha dugsiga kadib, xarumaha iyo naadiyada waxqabadka raaxada ayaa isticmaalayey Aula ilaa 2019.

Aula waxay ka dhigan tahay hoolka kulanka waxayna muujisaa bulsho iyo saaxiibtinimo. Aula waxaanu helnaa meel loo wadaago xiriirka iyo iskaashiga qaab sahlan, isticmaalaha u fudud oo ammaan ah taasi oo la socota carruurta laga bilaabo xannaanada ilaa dhammaadka dugsiga aasaasiga ah.

Iisticmaalkaaga Aula waxaad heli...

...xal sahlan oo isticmaalaha u fudud kaasi oo ku siinaya inaad aragtii wanaagsan ka haysato waxqabadyada maalinlaha ah ee ilmahaaga.

...hal meel oo aad ka gasho xiriirka kusaabsan ilmahaaga / carruurtaada laga bilaabo xannaanada ilaa dhammaadka dugsiga aasaasiga ah.

...lakab labaad oo ammaan kaasi oo lagu ilaalinayo xogta ilmahaaga.




Aula waxay xoojin doontaa wada shaqaynta

Ujeedada isticmaalidda Aula waa xoojinta wada shaqaynta u dhaxaysa guriga, shaqaalaha iyo carruurta.



Masuuliyadda la wadaago ee barashada ilmaha:



Isticmaalkaaga Aula waxaad...

...la socon kartaa wawa ka dhacaya dugsiga ilmahaaga ee maalintii.

...la xiriiri kartaa shaqaalaha iyo waalidiinta kale.

...isku diiwaangalin kartaa dhacdooyinka iyo kulamada.

Waynu u midaysannahay ka dhigidda Aula meel fiican oo habboon oo lagu xiriiro qoraal ahaan. Haddaba waxaynu u baahannahay inaynu is caawinno si aynu u joogtayno hadalka fiican iyo u isticmaalka "Reply to all" si laga fiirsaday.

Sida loo galo loona isticmaala Aula

1. Booqo aula.dk

2. Dooro

"Select Unilogin/NemID"




3. Ku gal Unilogin ama NemID

Miyaad illawday magaca ama baasweedhka aad ku gasho?

Halka ka hoosaysa Other Options, ka dooro: "Log in with, e.g., NemID",
ama hel

Unilogin adigoo dooranaya:
"Ma garanayo magacayga isticmaalah"



Marka ugu horraysa ee aad galaysa Aula, waxa waajib ah inaad isticmaasho NemID. Wuxuu sidoo kale jiri doona dhawr shay oo aad u baahan tahay si aad go'aan u qaadato. Tusaale ahaan, marka la eego sawirrada ilmahaaga, iyo sida loo isticmaali karo. Haddii aad isbaddasho, had iyo jeer waxaad ka baddali kartaa jawaabtaada Aula halka ka hoosaya "My profile".

Sida aad u adeegsanayso Aula

The screenshot shows the Aula application interface. On the left, there is a sidebar with icons for different sections: 1. Aragtiida Guud, 2. KALTIRSIIGA, 3. FARRIIMAHAA, 4. KAALAY/TAG, and 5. DIIWAANKA. The main area displays several cards:

- Aragtida Guud**: A card for "Waxa soo jeedinaysa Henrik - macallin cusub oo Red ah". It shows a profile picture of Henrik, a message from Camilla, and a document titled "Camilla - presentation.docx".
- Tijasbooyinka waalidka**: A card for "Tijasbooyinka waalidka" dated 18 November 2020. It shows a profile picture and a document titled "Parentalusto.pdf".
- Tixraac faafidda Koronaha**: A card for "Tixraac faafidda Koronaha" dated 18 November 2020. It shows a profile picture.

At the top right, there are user profiles for ALMA, KARL WILLIAM, KOOXAHA, BAAR, and BOROFAYLKAYGAA. Below them are search and filter icons. The bottom right corner shows a "INFOBA" window with a list of items and a timestamp of 10:00.

- 1 Halkan waxaad ku arki kartaa waxyaalaha ay soo dhigeen kooxaha aad ka tirsan tahay.
- 2 Halkan waxaad arki kartaa dhacdooyinka sida wada-sheekaysiyada iyo qabanqaabooyinka.
- 3 Halkan waxaad ka akhrin ama ku qori kartaa farriimaha. Waa inaad isticmaasho NemID-kaaga si aad u akhrido farriimaha macluumaadka xasaasiga ah wata.
- 4 Halkan waxaad ku qori kartaa wakhitiyada qaadista, iyo cidda qaadi ilmahaaga.
- 5 Halkan waxaad ku arki kartaa sawirada iyo fiidyawyada ay soo dhigeen kooxaha aad ka tirsan tahay.
- 6 Halkan waxaad dooran kartaa inaad aragto macluumaadka mid ama ka badan oo carruurtaada ah
- 7 Halkan waxaad ku heli kartaa kooxaha aad ka tirsan tahay.
- 8 Halkan waxaad wax ka baari kartaa Aula.
- 9 Halkan waxaad arki kartaa macluumaadkaaga xiriirka, diiwaanka shahsiga ah, oggolaanshiyaha iyo settings-ka wargelinta.
- 10 Halkan waxaad ka gali kartaa INFOBA.



App-ka Aula

Sidoo kale waxaad ka gali kartaa Aula app-ka Aula.

Waxaad isticmaali kartaa PIN code aad adigu dooratay ama farahaaga.

Waxaad ku shuban kartaa app-ka iPhone-ka ama iPad-kaaga waxaanu yaalaa App Store-ka ama Android-ka Google Play.

Baar "Aula" oo dooro qaybta buluugga ah ee waalidiinta.

Sida loo ilaaliyo xogta ilmahaaga ee Aula

Waa inaad ku astaysaa farriinta "sensitive" haddii aad dirayso farriin ay kujirto macluumaad xasaasi ah ama qarsoodi ah.

Waxa si otomaatig ah lagaaga codsan inaad isticmaasho NemID-gaaga haddii aad hesho farriin ay kujirto macluumaad xasaasi ah ama qarsoodi ah.

Macluumaadka xasaasiga ah iyo qarsoodiga ah ee shakhsiyeed waa macluumaad kusaabsan:

- Lambarka diiwaangalinta dadwaynaha ee dhexe
- Macluumaadka caafimaadka
- Arrimaha gaarka ah, tusaale
 - Caqabadaha barashada
 - Xidhiidhada qoyska
 - Jirrooyinka
 - Furriinka
 - Korsiga
- Caqabo bulsho oo gaar ah
- Diinta qofka aaminsan yahay
- Qoomiyadda iyo isirka qofka
- Xiriirada iyo doorashada jinsiga
- Habdhqaqanka dambiileno iyo dambi ku helidda

Ma garanaysaa...

inaad ku heli karto NemID isagoo app ah?

Wax badan ka akhri app-ka NemID nemid.nu

Haddii aad u baahan tahay caawimo

Wixii hagitaan iyo macluumaad kusaabsan Aula halkan ka eeg aulainfo.dk

Haddii shaki kaaga jiro ama wax su'aalo ah aad qabto,
la xiriir dugsiga barbaarinta ilmahaaga.

Ma wax dhib ayaad ku qabta Unilogin-kaaga?

Haddii aad illawday baasweedhkaaga ama magacaaga isticmaalaha, mid kale ayaad dooran kartaa. Fiiri halka ka hoosaysa "Sida loo galoo loona isticmaalo Aula".

Haddii aad wax dhibaato ah ku qabto Unilogin-kaaga, waxaad la xiriiri kartaa dugsiga barbaarinta ilmahaaga.